Dowlad Gobeleedka Punt land
Ee Soomaliya

Punt land State of
Somalia

Ministry of Women Development and Family Affairs

Wasaaradda Horumarinta Haweenka iyo Arrimaha Qoyska

Tel Office Golis 844409, Cell +2525441072, +2525729631 or 2525758385
Email ashagelle@yahoo.com,mowdafa_punt@hotmail.com,mowdafa_degen@hotmail.com

Ref: 219/Mowdafa/06 **Date- 09/12/06**

Xuska Munaasabada 16 maalmood ee loo aqoonsaday joojinta Shaqaaqooyinka dhanka ka ah Haweenka

Khusbadda Wasiirka Wasaaradda Haweenka Iyo Qoyska
Asha Gelle Dirie

Madaxwaynaha Dawlad Goboleedka Puntland mudane Mohamud Muse Hirsi , Gudoomiyaha Golaha Wakiiladda, Wasiiradda dawladgoboleedka Puntland, baarlamaanka,madaxda kale ee dawlada,haydaha caalamiga ah,haweenka,dhalinyarada saxaafada iyo dhamaan xubnaha ururada bulshada ee shirkan saaka ka soo qaybgalay Waxaan ugu horeyn anigoo ku hadlaya magaca masuuliyiinta iyo shaqaalaha wasaarada haweenka iyo Qoyska iyo dhamaan haween waynaha puntland dal iyo dibad meel kastoo ay joogaan aan idinku salaamayaa asalaama calaykum wa raxmatulaahi wabarakaatu.

Mudane madaxwayne ,mudanayaal iyo Marwooyin
Waxaa farxad wayn ii ah in aan mudane madaxwayne in nagala soo qaybgasho munaasibadan maanta oo bisha December tahay tahay 09, ahna maalin lagu soo gunaanaday 16 maalmood oo aduunka looga aqoonsaday ololeynta joojinta shaqaaqooyinka ka dhanka ah Haweenka iyo xaduguduyada loo geysto taas oo aduunwaynaha oo dhan oo soomaaliya ka mid tahay laga xusayo maalmaha 25ka November-10ka December 2005 isla markaana xadgubyada loo geysto haweenka loo aqoonsaday xadgudubyo xaquuqulinsaanka “Violation of women,s rights is a human rights violation”

Mudane madaxwayne
Labadii todobaad ee la soo dhaafay Wasaarada haweenka iyo qoyska waxaa ka socday shirar iyo aqoon iswaydaarsiyo isdabajoog ah oo ay ka soo qaybgaleen xubno ka socday wasaaradaha puntland, ururada deegaanka,dhalinyarada gabdhaha baarlamaanka iyo

golaha deegaanka ,iyo haween ka yimid 7da gobol ee puntlland haddana qaarkood fadhiyaan.

Mudane madxwayne
Xiritaanka aad noo xiri doonto gabagabada maalmaha loo aqoonsaday ololeynta ka hortagga shaqaaqooyinka dhanka ka ah haweenka waxaanu kaa filaynaa in aad wax ka tiraahdid isudheelitir la,aanta iyo u sinaan la,aanta xuquuqaha Raga iyo dumarka ee dhinacyada waxbarashada caafimaadka ,shaqooyinka iyo siyaasada ee ka jira puntland..

Mudane Madaxwayne Tusaale kooban hadaan soo qaado ,Shaqaalaha Puntland ka shaqeeya tiradooda inta la hubo waxaa weeye 2471 waxaa dumar ka ah 425 oo u dhiganta 5.8% , jagooyinka sarsare ee dawlada ee ka sareeya agaasime waaxeed waxaa ku jira 4 gabdhood baarlamaan ah, hal wasiir iyo hal agaasime guud , inta kale waxaa weeye adeegayaal, iyo xoghayn ,tiro yar ayaa wehelisa oo ah agaasime waaxeed madax qaybeed iyo madax bangi..waxaa ka sii daran shirkadaha puntland ee aan dawliga ahayn oo cida dhaqaalaha ugu badani ka soo gala ay haween yihiin sida xawaaladaha ,korontada, telephoonada, shirkadaha,warshadaha yaryar iwm dhamaan dumar la sheego kama shaqeeyaan.

Miisaaniyadii Puntland ee sanadihii 2005 iyo 2006 qoondada haweenku waxaa ay ka yareyd 1% ,sanadkan 2007na oo aanu filayney kororna waxba iskama badalin, waxaana u mahadnaqaynaa madaxwaynaha oo ogolaaday codsi ku saabsanaa in wasaarada loo ogolado 7 iskuduwe goboleed oo qoondadayadii sanadka 2007ee haweenka gaarsiisay 1% oo dhamystiran.

Mudane madaxwayne
ujeedayadu maha in aanan Ragga toosh ku ifino oo aanan wax u ogalayn ama aan ka xunahay xilalka ay hayaan, xirfadooda iyo hogaankooda, waxaanse rabnaa in aanu helo xuquuq le,eg mida ay ka helaan puntland gaar ahaan dhinacyada aasaasiga ah ee caafimadka,waxbarashada, shaqooyooyinka iyo siyaasadda maadaama tiro ahaan aan ka badnahay ayadoo lagu qiyaaso in dumarku yahy 55% halka raguna yahay 45% taas oo micnaheedu waxaa ay noqonaysaa 45% bulshadu waxaa ay heshaaa puntland xuquuq dhan 94.6% halka 55%na ay heleen 5.8% .

Xuska munaasibadan 16ka maalmood ee ololeynta shaqaaqooyinka dhanka ka ah haweenka waxaa sandkaan qaramada modoobay u xilsaareen hayadaha UNIFEM, UNDP iyo UNFPA oo aqooniswaydaarsiyadii maalmihii la soo dhaafay ka socday wasaarada haweenka casharo ka bixiynayey qabanqaabadana nala fududeeyey.

Mudane Madaxwayne
waxaan ku soo gunaanadayaa warbixinta maanta maadaama qaybihii kale ee barnaamijku iga dambeeyaan haweenku waa lafdhabarka bulshada ,hadi aanay hawlwalba geeska hayna horumar lama gaareen tusaale ahaan Xilligii xornimodoonka Waxaa ay ka qaybqaateen halgankii oo ay naftoodii iyo maalkoodiiba u hureen
Meelkasta oo ay joogto haweeni waa waa hooyo waana quudiyaha iyo barbaariyaha qoyska guud ahaan

Xilliyadda colaadaha: waxaa ka soo gaara haweenka dhaawacyo,dhimasho ,agoonimo,gaboodfalo iyo hantibeel.
Waa nabad jirayaal haweenku ,nabadoonada dhaqankase kuma jiraan, marka colaad labo qabiil dheerato waa lagu furdaamiya oo qabiilka waxtirsanaya waxaa diyada loo raaciyaa gabar godobtir ah si colada loo damiyo
Burburkii dawladii soomaaliyeed marka raggii waayyen shaqooyinkii asturnaa oo xafiisyada laga shaqaynayey oo qoysasku nolosha ka heli jireen haweenku waxaa ay dhabarka u riteen nolosha qoyska aygoo habeen iyo maalin ka shaqeeya shaqo dayacan oo dhib leh nacfiga ka soo baxaana yar yahay waxaana ay ku bixiyaan nolosha qoyska , waxbarashada ilmaha, iyo caafimaadka.

Haweenkii qoxootiga galay ayaa ah kuwa maanta biilka iyo nolosha qoysaska soomaaliyeed kafaala qaaday halka tirada Raga dhaqaale dadkooda u soo diraa ay aad u yar yihiin, sidoo kale bilicda magaalooyinka puntland waxaa kor u qaaday dhismayaasha casriga ah oo laga dhisay lacag gabar qaxooti ahi soo dirtay.

Waxtarkaas badan ka sokow haweenka dibadaha jooga oo lacagaha soo diraa waxaa ay la kulmaan **d**ayac,midabtakoor shaci la,aan,xuquuqaha wadankaas ka jira oo aanay ula sinayn dadka u dhashay,shaqooyin hoose hataa tan aqoonta leh, xaq la,aan,gaboodfalo iwm, sidoo kale haweenka guduhuna waxaa ay la kulmaan masuuliyad culus oo nolosha qoyska ka sokow, caafiaad daro aysan lahayn isbitaalo u gaar ah ,xarumo lagu xanaaneeyo gabdhaha agoomaha oon jirin, gobo xanaano caruur oo ilmaha loogu sii hayo inta ay xamalka ku maqan yihiin, duudsi xaqooda ,daryeel la,aan kuwa agoomaha haysta furiin gabdhaha yaryar oo ilmaha lagu furo aana lagu biilan,meherkooda oo madaxfurasho lagu xiro iwm.

Mudane Madaxwayne
Waan hubaa in badan oo halkan fadhida ama dhagysanayaa in aysan jeclaysanayn sheegsheegida waxayaalo badan lakiin ka daali mayno waligayo In aanu is sheeg sheegno, mar walba caqabadaha na haysta ku soo celcelino ,waxtarkayagana sheegsheegno waliba

Mudane madaxwayne
Waxaa mar kale dalbaynaa maanta in haween waynaha reer puntland oo jooga dalka gudihiisa iyo dibadiisa oo ku dhagaysanaysa kuna daawanaysaa aad balanqaad dhab ah u samayso si caqabadaha aan soo sheegnay oo dhan ay wax uga qabsoomaan

Wada Shaqaysi Wacan

Caasho Geele Diiriye
Wasiirka Hormarinta Haweenka iyo Arimaha Qoyska Puntland

Jadwalka Xuska <u>Munaasabada 16 maalmood ee loo aqoonsaday joojinta Shaqaaqooyinka dhanka ka ah Haweenka</u>
<u>25-10 Dec 2006</u>

Taariikhda iyo Maalinta iyo saacadda	Mawduuca	Qofka Hadlaya
Maalinta 09 2006		
7:30-9:00 subaxnimo	Soo dhawayn iyo diiwaangalin	Shaqaalaha Wasaaradda haweenka Iyo Qoyska
9:00 -9:10 subaxnimo	Furitaan Aayado quraan	Sheekh
9:10-9:20 subaxnimo	Ereyga soo Dhawaynta	Agaasimaha Guud ee wasaaradda
9:20-9:35 subaxnimo	Ujeedada munaasibadda	Wasiirka Wasaaradda Haweeka Iyo Qoyska
9:35-10:05 subaxnimo	Googoos haweenku soo bandhigayaan	Haweenka pubtland
10:05- 10-15 subaxnimo	Wakiilka UNDP	Rahama
10:15-10:25 subaxnimo	Wakiilka UNIFEM	Ayoo
10:25-10:35 subaxnimo	Wakiilka UNFPA	UNDP Laison
10:35-11:30 subaxnimo	Khudbadda Madaxwaynaha Dawlad goboleedka Puntland iyo Xiritaanka	Madaxwaynaha Pubtland Mudani Mohmud Muse Hirsi